



SOMALI

## ISTICMAALKA ADEEGYADA

### TURJUBAANKA EE 9-1-1

#### Wac 9-1-1 :

- marka ay ku haysato arrin degdeg ah oo khuseysa Boliska, Dab-damiska ama Caafimaadka.
- si aad u soo sheegtid dambi lagu dhex jiro ama markaasuun dhacay.
- marka ay jirto xaalad khatar u ah naf, maal ama labadaba ama khatar galin karta.
- marka ay jirto hawl shaki leh oo ay wadaan dad, ama baabuur aad moodid inay leeyihiin ulajeedo dambi.

**Habka 9-1-1 waxa uu leeyahay turjubaano ku caawin kara haddii aad Ingiriisiga kaga hadashid wax yar ama aanad kuba hadiin.**

**1. Marka aad soo wacdid, marka hore INGIRIISI ku sheeg adeegga aad u baahan tahay iyo afka aad ku hadashid**

"I need POLICE. I speak SOMALI."  
 "Waxa aan u baahanahay Bolis.  
 Waxa aan ku hadlaa Soomaali."

"I need the FIRE DEPARTMENT. I speak SOMALI."  
 "Waxa aan u baahanahay DAB-DAMIS. Waxa aan ku hadlaa Soomaali."

"I need MEDICAL help. I speak SOMALI."  
 "Waxa aan u baahanahay gargaar  
 CAAFIMAAD. Waxa aan ku hadlaa Soomaali."

**2. Shaqaalaha 9-1-1 waxa uu kugu xidhi doonaa turjubaan, taasoo laga yaabo inay qaadatao sekano.** Ku jir teleefonka inta lagu gudbinayo.

**3. Marka turjubaanku soo galo, ka jawaab su'aalaha lagu weydiyo.** Si sax ah ugu sheeg waxa dhacay adiga oo soo koobaya intii suurogal ah.



SOMALI

## ISTICMAALKA ADEEGYADA TURJUBAANKA EE 9-1-1

**4. Shaqaalaha 911 waxa uu go'aan ka gaadhi doonaa sida ugu fiican ee lagu gargaari karo marka uu eego marka aad silsid.** Diyaar u noqo inaad u sheegtid shaqaalaha:

- meesha arrinta degdeggu ka socoto. Ku dar lambarka dhismaha, lambarka abaarmanka, magaca jidka, iyo wixii ah war jihada ah (sida waqooji-galbeed, koonfur, iwm.)
- magacaaga, adreeskaaga iyo lambarka teleefonka ee aad naga soo wacaysid.

**5. Teleefonka ha dhigin ilaa laguu sheego inaad dhigtid.** Ku jir teleefonka ilaa shaqaaluhu kuu sheegayo inaad teleefonka dhigi kartid.

Haddii aad u baahan tahay turjubaan si aad ula hadashid Boliska ka dib marka ay kuu yimaadaan, waxa lagu siin karaa turjubaan.

#### Fadlan la soco:

- wicitaanada 9-1-1 ee laga sameeyo teleefoonada lacagta ah waa bilaash.
- haddii aad rabtid inaad isa sheegin ama aad rabtid in warku ahaado qarsoodi, u sheeg shaqaalaha:
- haddii si aan ku-talagal ahayn aad u wacdid 9-1-1, HA DHIGIN TELEEFONKA! Ku jir teleefonka una sheeg inaanad ku talagal inaad soo wac-did.

